

Bostarka Khidmadaha Dugsiga Qoysaska Ardayda ku jirta Darajooyinka 7-12



WAA LA HELI KARAA KAALMO HADDII AADAN AWOODIN IN AAD BIXISID KHIDMADAHA DUGSIGA.

Sharciga gobolka ayaa raba in la hubiyo in ardayga ay waalidiintiisa awoodin in ay bixiyian khidmadda in uu heli karo ka-dhaafidda khidmadda ama qodob kale oo lagu baddalo ka-dhaafidda khidmadda.

DHAMAAN KHIDMADAHA DUGSIGA WAXAY HOOS YIMAADAAN KA-DHAAFID.

YAA XAQ U LEH IN LAGA DHAAFI KHIDMADAHA?

Waxaa dhici karto in ardayga uu xaq u yeesho in laga dhaafto khidmadaha haddii MID ka mid ah kuwa soo socdo lagu dabaqo:*

- marka qoyska ardayga qaato TANF (kuboonka raashinka ama Brograamka Shaqada Qoyska Gobolka (State Family Employment Program))
- marka ardayga qaato SSI (Dakhliga Sekuritiga Dheeraadka) (Supplemental Security Income)
- marka ardayga ay koriyaan dad kale
- marka ardayga ku jiro xabsiga gobolka
- marka ardayga uu xaq u yeesho taasoo ku saleysan dakhliga qoyska/reerka (heerarka waafaqsan yahiin xaq u yeelashada qadada lacag la'aanta)

*Ardayga wuxuu kaloo xaq u yeelan karaa ka-dhaafidda khidmadda haddii uusan la kulmin mid ka mid ah heerarkan balse uusan weli bixin karin khidmadda. Fadlan u tag dugsiga xaafadda ama fiiri siyaasadda dagmada si aad u heshid macluumaad badan.

SIDEEN KU DALBAN KARNAA KA-DHAAFIDDA KHIDMADDA?

Ardayga ama waalidka ayaa dalban kara ka-dhaafidda khidmadaha:

- marka ay buuxiyaan arjiga ka-dhaafidda khidmadda
- marka ay arjiga oo buuxa u gudbiyaan dugsiga
- marka ay keenaan warqadaha xaq u yeelashada ka-dhaafidda khidmadda. (Fiiri Arjiga Ka Dhaafidda Khidmadda (Fee Waiver Application) xagg warqadaha loo baahan yahay)

Sharciga gobolka wuxuu dugsiyada ka raba in ay xaqiijiyaan xaq u yeelashada ka-dhaafidda khidmadda. Dugsiga wuxuu diiwaanka gelin doonaa warqadaha xaq u yeelashada la gaarsiiyay haddii ay la kulmaan sharuudaha xaq u yeelashada kaddibna Go'aanka iyo Racfaanka. foomka waxaa loo diri doonaa ardayga. Kaddib marka la diiwaan geliyo, dugsiga ma hayn doono koobiyada warqadaha xaq u yeelashada.

SIDEE AYAY KA-DHAAFIDDA U SAAMAYSAA KA-QEYBGALKA ARDAYGA XAGGA HAWLAHA DUGSIGA?

Haddii ardayga uu xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda, **waa in laga dhaafto DHAMAAN khidmadaha.** Tan waxaa ka mid ah khidmadaha diiwaan gelinta, buugaagta, fasalada, isboortiga, naadiyada, kooxaha ku-celcelinta, safarada, khidmadaha albaabka, labbiska, kaararka hawlaha, lokarada, hawlaha ka baxsan manhajka, xerooyinka kooxda kuleylaha, iwm.

Haddii ardayga uu xaq u yeesho ka-dhaafidda khidmadda, dugsiga kama rabo ardaygaas in uu shaqeeyo baddalkii uu qaadan lahaa ka-dhaafid, ama weydiisan lahaa in uu kis-kis u bixiyo khidmadda.

Lama ogola in dugsiga uu ka-dhaafidda khidmadda ardayga la wadaago qof aan u baahneyn in uu ogaado.

Lama ogola in dugsiga aruuriyo lacag, yareeyo, ama ceshto darajooyinka, ama reebto shahaadooyinka, diiwaanada dugsiga, jadwalada fasalka ama ka-qeybgalka inta uu socdo maalin dugsiyeedka si loo hirgeliyo bixinta kharashka dugsiga.

Si aad u ogaatid in badan, la xariir dugsiga ardaygaada, booqo bogga internetka dugsigaada, ama booqo bogga internetka khidmadaha dugsiga gobolka (<https://schools.utah.gov/schoolfees>).

Su'aalaha, Faalada, ama Arrimaha? La xariir kooxda Khidmadaha Dugsiga (School Fees) schoolfees@schools.utah.gov.